DHS | Oregon Department of Human Services
INTELLECTUAL/DEVELOPMENTAL DISABILITIES

Su'aalaha Inta Badan La Isweydiiyo (FAQ)

Tallaalka COVID-19 ee loogu talagalay Adeegyada Naafanimada Maskaxda/Korriinka (I/DD)

Ogow: Su'aalaha la isku soo ururiyay oo ka socda kulankii dhageysiga ee la qabtay Diisambar 21, 2020 lana soo dhejiyay Janaayo 12, 2021.

Ogow: Su'aalaha iyo jawaabaha guud ee tallaalka COVID-19 waxay ku jiraan website-ka Maamulka Caafimaadka Oregon. **https://covidvaccine.oregon.gov/**

Dadka/Qoysaska

Su'aal: Miyay tahay in aan kala doorto tallaalka aan helayo?
Jawaab: Maya. Oregon waxay mudnaanta siinaysaa tallaalka Pfizer oo loogu talagalay barnaamijka iskaashiga farmashiyaha federaalka. Waqtigan la joogo CVS, Walgreens iyo Consonus ayaa xarumaha caafimaadka ku qaban doona xarumaha halka ay ku bixiyaan tallaalka Pfizer oo kaliya. Iyada oo agabka dhanka tallaalka uu kala duwan yahay bilaha soo socda, Moderna, ama waxyaabaha kale ee dhanka tallaalka ayay dhici kartaa in loo qoondeeyo barnaamijkani.

Su'aal: Sidee baan ku ogaadaa goorta gurigayga la siinayo tallaalo?
Jawaab: Daryeelkaaga/gurigaaga koox ahaanta loo degan yahay ee I/DD ayay la xiriiri doonaan mid ka mid ah saddexda farmashiye si loo dejiyo taariikh loogu talagalay barnaamijka tallaalka oo ka jira xaruntaada.

Su'aal: Miyay tahay in aan oggolaado in aan helo tallaal sidee buuna dhakhtarkaygu ugu lug yeelanayaa go'aankani?
Jawaab: Tallaalka lama siin doona qof kasta oo aanan rabin isaga. Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) ayaa si adag ugu talinaysa tallaalka loogu talagalay badbaadada iyo caafimaadka bulshada oo dhan. Fadlan fiiri xaashida xaqiiqda kala doorashada tallaalka ODDS tixraac ahaan.

Su'aal: Miyuu wakiilka daryeelka caafimaadku u oggolaan karaa qofka? Ka waran mas'uulka?
Jawaab: Adiga (ama mas'uul haddii aad leedahay mid) ayaa go'aansan doona qaadashada tallaalka iyo in kale. Waxaad adeegsan kartaa xubno ka tirsan qoyska, asxaab ama xirfadlayaal lagu kalsoon yahay (sida daryeel bixiyaha caafimaadka) oo loogu talagalay taageerada si go'aan loo gaaro. Waxaad mar kasta weydiin kartaa su'aalo dheeraad ah, codsan kartaa in macluumaadka si kale loo dhigo, ama codsan kartaa in macluumaadka lagu bixiyo hab aad fahmayso. Haddii aad magacowday qof si uu kaaga caawiyo xaalado caafimaad, sida wakiilada daryeelka caafimaadka, ama u doodaha daryeelka caafimaadka, waxay kaa caawin karaan in aad go'aansato haddii tallaalku uu kugu habboon yahay.

Su'aal: Haddii aan horeba u qabay COVID-19, miyaan wali heli karaa tallaalka?
Jawaab: Haa. Tallaalada COVID-19 waa in la siiyaa dadka iyada oo aan la eegayn taariikhda infekshanka COVID-19. Kuwa qaba astaamaha cudurka oo uu si firfircoon u soo gaaray infekshanka COVID-19 waa in ay sugaan toddobaadyo dhowr ah ilaa hal bil ka hor inta aan la tallaalin.

Su'aal: Gabarta aan dhalay waxay qabtaa autism iyo naafanimada maskaxda korriinka oo dhexdhexaad ah iyo ka cabsiga maaskaraha "phobia." Labadeeda Shaqaalaha Taageerada Shakhsiyeed ee ay leedahay ma xirtaan maaskaro marka ay iyada la shaqeynayaan iyada sababta oo ah cabsida ay ka qabto 'phobia' maaskaraha. Sidee baan ku ogaadaa goorta dadka sida gabarta aan dhalay oo kale heli karto tallaal?
Jawaab: Laga soo bilaabo Janaayo 5, 2021, OHA waxay tilmaantay in qof kasta oo ka tirsan Wajiga 1a, kooxaha 1-4, ay heli karaan tallaalka. Maamulka Caafimaadka Oregon ayaa dejiyay liiska mudnaanta ee loogu talagalay wajiyada hore ee tallaalka. Kooxaha loogu talagalay nidaamka adeeg ee I/DD ayaa ku qoran Xaashida Xaqiiqda ee Wajiga 1a ee ODDS.

Su'aal: Miyaad ogtahay haddii ay tahay in baaritaanku noqdo mid aan hore la iskaga helin cudurka ka hor inta aan la qaadan tallaalka?
Jawaab: Uma baahnid in aad hesho natiijada baaritaanka oo ah in aan la iska helin cudurka ka hor inta aan la qaadan tallaalka.

Su'aal: Miyaad qaadan kartaa tallaalka haddii la ogaado in aad qabto cudurka? Maxaa dhacaya haddii aadan qabin astaamaha cudurka oo la

ogaado in aad qabto cudurka oo ka dibna aad qaadato tallaalka? Tani miyay keenaysaa haliso dheeraad ah ama fursad dhanka raadadka ah?
Jawaab: Sida laga soo xigtay OHA, daraasado ayaa muujiyay in aysan jirin halis dheeraad ah oo ay u leedahay dadka aan qabin astaamaha cudurka ee baaritaankii lagu sameeyay oo lagu ogaaday in ay qabaan cudurka marka ay qaataan tallaalka. Kuwa qaba astaamaha cudurka oo uu si firfircoon u soo gaaray infekshanka COVID-19 waa in ay sugaan toddobaadyo dhowr ah ilaa hal bil ka hor inta aan la tallaalin. Ma jiraan raadad dheeraad ah oo ka dhalanaya qaadashada tallaalka marka aan la qabin astaamaha cudurka ee laakiin la ogaado in la qabo cudurka.

Su'aal: Maxaan filan karaa marka aan qaato tallaalka? Miyaan jiran doonaa?
Jawaab: Sida laga soo xigtay FDA, raadadka ugu badan ee laga ogaado tijaabooyinka dhanka tallaalku waxaa ku jira xanuun, guduudasho ama barar laga dareemo meesha la iska tallaalo, daal, madax xanuun, qarqaryo, muruq xanuun iyo xanuunka kala goyska. Marka la is tallaalo ka dib, waxaa lagula socon doonaa 15 daqiiqo si xirfadlayaasha daryeelka caafimaadku u fiirin karaan wixiii falcelin ah. OHA ayaa haysa macluumaad dheeraad ah oo ku jira website-keeda.

Su'aal: ODDS ayaa soo sheegtay in waalidiinta/mas'uuliyiinta dhashay carruur caafimaad ahaan nugul lagu dari doono Kooxda 3. Ka waran xubnaha waaweyn ee ka tirsan qoyska ee kale oo la nool ilmaha miyaa lagu dari doonaa?
Jawaab: Dhammaan xubnaha waaweyn ee ka tirsan qoyska ee la nool ilme ama qof weyn oo qaba naafanimada maskaxda iyo korriinka, oo ay ku jiraan dadka loo arko in ay yihiin kuwo caafimaad ahaan nugul, waxay heli doonaan tallaalka.

Su'aal: Waa maxay shuruudaha lagu go'aaminayo haddii qof dhallinyaro ahi uu yahay mid caafimaad ahaan nugul?
Jawaab: Carruurta iyo dadka waaweyn ee qaba I/DD ayaa guud ahaan dhaca qaybtani. Laga soo bilaabo Janaayo 5, 2021, OHA ayaa Mas'uuliyiinta Caafimaadka Dadweynaha ee Degaanka (LPHA) u sheegtay in ay tallaalo siiyaan qof kasta oo ka tirsan dhammaan Kooxaha 1 – 4 ee Wajiga 1a. Dhammaan dadka qaba naafanimada maskaxda iyo korriinka (I/DD) iyo daryeelayaashooda ama daryeel bixiyayaashooda ayaa lagu daray Wajiga 1a.

Su'aal: Miyuu qofka daryeel bixiyaha ah/PSW qaadan karaa tallaalka isla waqti la mid ah ka qofka? Maxaa dhacaya haddii aanu rabno in shaqaaluhu aysan dhammaantood tallaalka qaadanin waqti isku mid ah?
Jawaab: Haa. Dhammaan daryeel bixiyayaasha iyo dadka la nool qof waxa dhici karta la tallaalo waqti isku mid ah. Ilaa iyo heerka taasi u dhici karto ama u dhici doontaa waxay ku xiran tahay sida LPHA ay u bixinayso helitaanka tallaalka. Dadka badankoodu waxay leeyihiin falcelin khafiifka ah ilaa dhexdhexaadka ah oo la xiriirta tallaalka. Wax aan ka badnayn boqolkiiba 5-10 ayaa dareema liidasho xun maalinta xigta si ay u qaataan maalin fasax ah. SEIU iyo Guddiga Daryeelka Guriga ee Oregon ayaa isku duwaya tallaalada loogu talagalay Shaqaalaha Taageerada Shakhsiyeed.

Su'aal: Goorma ayay qoysasku ogaan doonaan in tallaalada Pfizer ay heli karaan dhallinyarada 16-18?
Jawaab: LPHA ayaa abaabulaysa xarumaha tallaalka oo ku yaala degaannada maxalliga ah oo loogu talagalay dhammaan dadka ka tirsan Wajiga 1a. La xiriir Iskuduwahaaga Adeegyada si aad u ogaato marka xarumaha tallaalku ay ka jiraan degaankaaga.

Su'aal: Sidee bay qoysaska/dadku u ogaan doonaan goorta ay u qalmayaan tallaalada?
Jawaab: Dhammaan kooxaha ka tirsan Wajiga 1a, oo ay ku jiraan dadka qaba I/DD iyo daryeel bixiyayaashooda, ayaa u hadda u qalma tallaalka. Fadlan la soco macluumaad ka socda LPHA degaankaaga oo la kaasho Iskuduwahaaga Adeegyada ama Wakiilka Shakhsiyeed si aad u ogaato marka xarumaha tallaalku ay ka jiraan degaankaaga.

Su'aal: Ma jiraan dhowr maalmood tallaalka hargabka 'flu' ka dib oo ay tahay in aan sugo ilaa laga gaarayo Tallaalada COVID 19?
Jawaab: Iska ilaali qaadashada tallaalka hargabka 'flu' iyo tallaalada kale muddo 14 maalmood ah ama ka dib tallaalka COVID-19. Haddii qof si aan u kas ahayn u helo tallaalka COVID-19 oo uu weheliyo tallaal kale, ma jiraan baahi loo qabo in lagu celiyo qiyaasta labada tallaalba.

Su'aal: Haddii aan qaato Pfizer iyada oo ah qiyaasta hore, miyaan u baahanahay in aan la sii joogo Pfizer qiyaasta labaad ama ma heli karaa Moderna?
Jawaab: Kuwa qaatay mid ama tallaal kale oo ka socda Pfizer ama Moderna, waa in ay qiyaasta labaad ka helaan daawo soo saare isku mid ah.

Su'aal: Miyay ODDS qorsheynaysaa aqoonsiga tallaalka 'vaccine passport' oo telefoonka looga soo dejin karo caddeyn ahaan? Wadamo kale ayaa tani sameeyay.
Jawaab: ODDS ma bixin doonta caddeynta tallaalka. Marka qofka la tallaalo, hay'ada bixinaysa tallaalka ayaa bixin doonta kaar wata taariikhda/waqtiga tallaalka.

Su'aal: Maxaa dhacaya haddii aan qiyaastayda labaad ku heli kari waayo marka la gaaro taariikhda la aqoonsaday?
Jawaab: La xiriir xirfadlaha daryeelkaaga caafimaad oo weli isku day in aad hesho tallaal labaad. Uma baahnid in aad dib u bilawdo jadwalka tallaalka.

Su'aal: Miyaan u baahnaan doonaa in aan xirto maaskaro ka dib marka aan qaato tallaalka?
Jawaab: Haa, dadku waxay u baahan yihiin in ay xirtaan maaskaro oo ay raacan borokoolka COVID-19 sida kala fogaanshaha jir ahaaneed iyo dhaqidda gacmahaaga ilaa laga helayo xog dheeraad ah oo lagu go'aaminayo isbeddelo ku yimaada hababkan wax loo qabanayo.

Su'aal: Goorma ayaan ku soo laaban karaa hawlahaygii aan jeclaa sida aadista aflaanta?
Jawaab: Wax badan ayaa ku xiran marka xaalada caafimaad ee degdega ah ee bulshada ee qaranka iyo gobolka iyo Amarka Amarka Fulineed ee Guddoomiyaha Gobolku joogsado. Ka qayb qaadashada hawlaha qaarkood ayaa sidoo kale ku xiran halka degaankaagu uu ku yaalo marka la eego heerarka halista iyo waxa furan degaankaaga.

Su'aal: Waxaan hayaa su'aalo dheeraad ah oo ku saabsan tallaalka, halkeen aadaa si aan u helo macluumaad dheeraad ah?
Jawaab: Maamulka Caafimaadka Oregon website-kiisa tallaalka COVID-19, Xarumaha la Dagaalanka iyo ka Hortagga Cudurka website-kooda tallaalka COVID-19 iyo daryeel bixiyahahaaga caafimaadka ayaa ah ilo.

Daryeel bixiyayaasha

Su'aal: Waxaan haynaa dad aan wax oggolaan karin oo aanan lahayn mas'uul ama U doodaha Caafimaadka. Waxaan walwal ka qabaa in aanu seegno fursadooda ay ku helayaan tallaalka, laakiin waxaan sidoo kale

rabaa xaqiijinta in aanu leenahay xuquuqda wax oggolaanshaha. Hal fikrad oo la hadal hayo ayaa ah in Kooxda ISP ay yeelan karto diiwaanka wada hadalka, laakiin fahamkaygu waa in ay ansixin karaan balse aysan oggolaan karin. Markaa miyuu amarka dhakhtarku noqon karaa mid ku habboon?
Jawaab: Su'aashani kala hadal farmashiyaha degaanka ama LPHA ka hor inta aadan qofka qaadin si uu qaato tallaalka.

Su'aal: Waa maxay qaybta shaqaalaha u qaabilsan xarumahan tallaalku, marka si kale hadalka loo dhigo, maxaa si gaar ah looga codsan doonaa in uu sameeyo gurigaygu si aan iskugu diyaarin karo oo aan isku habayn karo ilaha?
Jawaab: Haddii uu gurigaagu qoran yahay Iskaashiga Farmashiyaha, hawl-wadaagaha farmashiyaha ayaa tilmaami doona waxa ay tahay taageerada ay kaaga baahan yihiin. Hawl-wadaagayaasha farmashiyaha ayaa sidoo kale macluumaadka qaarkiis ka dhigay mid laga heli karo dhanka internet-ka kaasi oo faham cad kaa siin kara doorarka iyo waxyaabaha la filayo. Ogow waxyaabo dheeraad ah oo ku saabsan barnaamijka farmashiyaha:
CVS/Omnicare: www.omnicare.com/covid-19-vaccine-resource
Walgreens: www.walgreens.com/topic/findcare/long-term-care-facilitycovid-vaccine.jsp#faq
Consonus: www.consonushealth.com/covid-19-pharmacy-updates/

Su'aal: Miyay CVS, Walgreens iyo Consonus macluumaad hore ka sii siin doonaan
dadka degaankeena si looga jawaabo su'aalahooda?
Jawaab: Haa. Goobuhu waxay hawl-wadaagayaasha farmashiyaha federaalka ka codsan karaan macluumaad si loola wadaago dadka degaanka.

Su'aal: Sidee baan u ogaan doonaa haddii wakiilkayga gurigu uu yahay qayb ka mid ah barnaamijka Iskaashiga Farmashiyaha.
Jawaab: Daryeel bixiyayaasha ay la soo xiriireen Walgreens, Consonsus ama CVS midkood waxay sii wadi doonaan in ay kala shaqeeyaan farmashiyayaashaasi qorsheynta iyo helitaanka tallaalo. Daryeel bixiyayaasha aysan la soo xiriirin mid ka mid ah hawl-wadaagayaasha farmashiyaha, hadda ka dib wada xiriir kama helayaan hawl-wadaagayaasha farmashiyaha, ama waxaa loo sheegay aysan hadda ka

dib u qalmin, u baahan yihiin in ay la shaqeeyaan maamulka caafimaadka dadweynaha ee degaanka (LPHA) iyo hay'ada maamulka kiiska si loo aqoonsado fursado looga qayb qaato xarumaha tallaalka.

Su'aal: Sidee baan ula kaashadaa daryeel bixiyayaasha caafimaadka ee ay leeyihiin dadka degaanku?
Jawaab: Dadka degaanku waxay heli doonaan kaar tilmaamaya helitaankooda tallaalka. Mas'uuliyada waxay saaran tahay daryeel bixiyaha iyo qofka degan goobta si ay ula socod siiyaan daryeel bixiyahooda caafimaad. Barnaamijka farmashiyaha federaalka iyo xarumaha caafimaadka waxaa loo sameeyay si ka madax banaan adeegyada daryeelka caafimaadka guud ee bukaanka.

Su'aal: Miyay ODDS qorsheynaysaa dirista tilmaamo la xiriira in Kooxda ISP wada hadalo dadka kala yeelato tallaalka?
Jawaab: ODDS ayaa dejisay xaashida xaqiiqda si qofka looga caawiyo in uu fahmo sida tallaalku u caawin karo isaga.

Su'aal: Waa fahamkayga in ODDS aysan dadka ama shaqaalaha uga baahan doonin in ay qaataan tallaalka. Xaalku wali ma sidaas baa oo ma aragtaa in taasi haba yaraatee isbeddelayso?
Jawaab: ODDS lagama filayo in ay qofna uga baahato in la tallaalo. Shaqo-bixiyayaasha shakhsi ahaaneed waxay dejin karaan shuruudahooga gaarka ah oo loogu talagalay shaqaalaha laakiin ma jirto in dadka qaba I/DD looga baahan doono in la tallaalo.

Su'aal: Miyaa Shaqaalaha Taageerada Shakhsiyeed (PSW) mudnaanta koowaad la siin doona qaadashada tallaalka?
Jawaab: PSW ayaa lagu daray Wajiga 1a, oo ay weheliyaan shaqaalaha kale ee adeegyada guriga-dhexdiisa siinaya dadka qaba I/DD.

Su'aal: Miyay PSW qaadan doonaan tallaalka isla waqti la mid ah dadka ay taageeraan? Ama miyay dadku heli karaan PSW ka hor?
Jawaab: Dadka qaba I/DD ee helaya adeegyada guriga-dhexdiisa iyo shaqaalaha taageerada ee bixiyaha adeegyadaasi, oo ay ku jiraan PSW, ayaa si wadajir ah mudnaanta loo siinayaa Kooxda 3 ee Wajiga 1a.

Su'aal: Haddii uu qofku galo goobaha daryeelka oo la isku ursursan yahay (guryaha koox ahaanta loo degan yahay iyo guryaha daryeelka ilmo

korsiga) ka dib marka xarunta la tallaalo, ma jiri doonaa qof diyaar u ah in uu talaalo qofka hadda uun soo guuray?
Jawaab: Su'aashan waa in la weydiiyo hay'ada daryeelka bixisa ama LPHA.

Su'aal: Maxaa dhacaya haddii qofku diido in uu xirto maaskaro, taasi miyay dhibaato u noqonaysaa qofka bixinaya tallaalka?
Jawaab: Tani waa qayb ka mid ah isku duwida iyo wada xiriir ay daryeel bixiyayaashu gacan ka geysan karaan ka hor inta aysan hawl-wadaagayaasha farmashiyuhu imaanin guriga si ay u bixiyaan tallaal.

Su'aal: Maxaa dhacaya haddii qof ku jira daryeel/koox ahaaneed ama guriga-dhexdiisa ah uu doorto in aan la tallaalin inta lagu guda jiro mudnaanta Kooxdiisa oo ka dibna waqti dambe beddelo maskaxdiisa, miyay noqon doontaa in uu sugo ilaa inta laga gaarayo inta dadweynaha guud mudnaanta laga siinayo? Ayay tahay in uu la xiriiro?
Jawaab: Qof kasta waxaa lagu dhiirigelinayaa in uu sida ugu dhakhsaha badan u qaato tallaalka marka uu noqdo mid uu heli karo. Haddii qof go'aansado in aan la tallaalin waqtigaasi, waxaa looga baahnaan doonaa in ay la shaqeeyaan caafimaad bixiyahooda ama Maamulka Caafimaadka Dadweynaha ee Degaanka si loo go'aamiyo goorta uu awoodi doono in uu qaato tallaal mustaqbalka.

Su'aal: Waa maxay sharraxaada daryeel bixiye? Ma ku jiraan dad lacagta la siiyay iyada oo la sii marayo CDDP?
Jawaab: Haa. Dhammaan dadka lacagta la siiyo ama aan la siinin ee taageero siinaya dadka qaba naafanimada maskaxda iyo korriinka waxaa loo tixgelinayaa daryeel bixiye iyada oo aan la eegayn cidda lacagta siinaysa (aanan lacagta siinayn iyaga) si ay u bixiyaan daryeel.

Su'aal: Miyaa qof ama shaqo-bixiye uga baahan karaa in DSP ama PSW la tallaalo?
Su'aal: Shaqo-bixiyayaashu waxay u qofka uga baahan karaan tallaalo ama waxay dooran karaan in ay shaqaaleysiiyaan oo kaliya dadka qaatay tallaalka.

Su'aal: Sidee baa caymisku u bixin doonaa lacagta tallaalkani?
Su'aal: Sharciga dowladda federaalka ayaa faraya shirkadaha caymiska in ay bixiyaan lacagta tallaalka. Ma jiro qof lagu soo dalici karo wax lacag ah

oo la xiriirta tallaalka. Haddii uu qofku dhibaato kala kulmo shirkadaha caymiska, gobolka ayaa halkan u jooga in uu gacan ka geysto hagistiisa.